



Affordable Connectivity Program Helping Households Connect

Barnaamijka Interneedka Raqiiska ah (Affordable Connectivity Program (ACP) waa barnaamij ay bixiso FCC kaasoo ka caawiya qoysaska iyo dadka guryaha ku nool inay helaan adeeg interneed oo qiimo jaban.

ACP ayaa baxsha:

- Qiimo dhimis dhan ilaa \$30/bishii oo khadka interneedka ah;
- Qiimo dhimis dhan \$75/bishii oo la siinaayo qoysaska u qalma ee dhulka qabiilada; iyo
- Qiimo dhimis halmar ah oo dhan \$100 oo lagu bixinaayo laabtoobka, kumbuyuutarka wayn, ama taableed laga iibsaday shirkad adeegga bixisa oo barnaamijka ka tirsan haddii qoysku baxsho wax ka badan \$10 ama ka yar \$50 qiimaha iibka aalada.

ACP ayaa ku kooban qiimo dhimista bishiiba halmar ah iyo qiimo dhimista hal aalad qoyskiiba.

Miyaan U qalmaa?

Qoys ayaa u qalma ACP haddii dakhliga qoysku ka hooseeyo cabirka 200% ee [Xadiyada Federaalku u xadeeyay Fakhriga](#), ama haddii xubin kamid ah qoysku buuxsho ugu yaraan hal kamid ah shuruudaha hoose:

- Uu qaatay Deeqda Pell ee Federaalka intii lagu jiray sanad abaal marineedka hadda socda;
- Uu buuxsho shuruudaha u qalmida ee ka qaybgelida barnaamijka interneedka dadka danyarta ah ee shirkadu hadda bixiso;
- Uu ka qaybgalo mid kamid ah barnaamijyadaan caawimaada:
 - SNAP
 - Medicaid
 - Kaalmada Dawlada ee Guriyaynta (Federal Public Housing Assistance)
 - Qarashka Caawimaada Dhaqaalaha (Supplemental Security Income (SSI))
 - WIC
 - Gunnooyinka Lacagta beeshinka Saraakiisha hore ee Ciidanka ama dadka ay ka Dhinteen (Veterans Pension or Survivor Benefits)
 - ama [Lifeline](#)
- Uu ka qaybgalo mid kamid ah barnaamijyadaan caawimaada uuna ku nool yahay [Dhulka Qabiilka ee U qalma Deeqda](#):
 - Kaalmada Guud ee Laanta Arimaha Dadka Hindida ah (Bureau of Indian Affairs General Assistance)
 - Barnaamijka TANF ee Qabiilada
 - Barnaamijka Cunto Qaybinta ee Dhulka Hindada (Food Distribution Program on Indian Reservations)
 - Barnaamijka Head Start ee Qabiilada (oo lagu salaynaayo dakhliga qofka)

Labo Talaabo oo Isdiwaan Gelin ah

1. Booqo [AffordableConnectivity.gov](#) kadibna dir codsi ama soo daabaco codsi boostada aad soo dhigayso; iyo
2. La xariir shirkada aad doonayso si aad u xulato qorshe qiimo dhimistana loogu dabaqo qarashka lagaa rabo.

Shirkadaha qaarkood ayaa lahaan kara codsi gaar ah oo ay kaa dalban doonaan inaad buuxiso.

Dadka u qalma waa **inay codsadaan barnaamijka ayna sidoo kale la xariiraan shirkadooda si ay u codsadaan qorshaha adeegga.**



Greater Milwaukee
& Waukesha County



@UnitedWayGMWC
#UnitedWayGMWC
UnitedWayGMWC.org



Affordable Connectivity Program Helping Households Connect

Hel Adeegyada Interneedka oo Qiimo Jaban

Si aad u hesho adeegyada Interneedka oo Qiimo Jaban kana shaqeeya aagaaga:

- Booqo everyoneon.org/find-offers
- Wac (302) 367-7411 si aad u hesho Caawimaada Diiwaan Gelinta Adeegga Interneedka ee EveryoneOn

Adeegyada interneedka ee qiimaha jaban oo aad u qalmi karto waxaa kamid ah:

- **Access from AT&T**
 - \$30 ama kayar
 - Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (855) 220-5211
 - Dhaatada interneedka: 150GB ama 1TB ayadoo ku xiran nooca iyo xawaaraha la heli karo
 - Lagaama rabo qarashka xirista moodhanka Wi-Fi ga guriguna waa bilaash
- **PCs for People**
 - \$15/bishii
 - Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (877) 450-8585
 - Dhaatada interneedka: Ma xadidna
 - 3 qorshe oo lacagta la hormarsanaayo ayaa la heli karaa: Adeeg 3 bilood ah (\$45 oo aad bixinayso \$15/bishii); adeeg 6 bilood ah (\$85 oo aad bixinayso \$14.16/bishii); adeeg 12 bilood ah (\$135 oo aad bixinayso \$11.25/bishii)
- **Spectrum Internet Assist**
 - \$17.99/bishii
 - Wixii macluumaad dheeraad ah, wac: (844) 525-1574
 - Dhaatada interneedka: Ma jiraan xirmooyin cayiman oo interneedka ah, moodhanku waa bilaash, iyo Difaaca Interneedka oo bilaash ah

Tijaabi Xawaaraha Interneedkaaga

Si aad u tijaabiso xawaaraha interneedkaaga, booqo: <https://expressoptimizer.net/public/>